

# Aan Gudbin Natiijada:

Ogaysiiska Natiijada Baadhista  
Pulse Oximetry-ga

Barnaamijka Baadhista  
Dhawaan-dhaladka  
Minnesota



## Ilmahaagu ma gudbin baadhista pulse oximetry.

### Waa maxay xanuunka wadnaha lagu dhasho ee khatarta ah (CCHD)?

Xanuunka wadnaha lagu dhasho waa kooxda ugu badan xanuunada lagu dhasho. Xanuunada wadnuhu waxay dhibaatooyin ku keenaan qaabdhismeedka wadnaha iyo sida dhiigu u socdo. CCHD waxa loo tixraaca xanuunada wadnaha ee ay tahay in xilli hore wax laga qabto si gacan looga gaysto kahortaga dhibaatooyinka kale ee caafimaad.



### Maxay baadhista CCHD ay muhiim u tahay?

Inkastoo ultrasound-ka dhalnada kahor uu dareemi karo kiisaska qaar ee CCHD, dhammaantood lama dareemi karo kahor dhalnada. Haddii aan la baadhin inyar kadib dhalashada, carruurta qabta CCHD marmarka qaar waxa la geeyaa guriga iyada oon la daryeelin sababtoo ah waxay u muuqdaan inay caafimaad qabaan. Marka guriga, carruurtani waxay yeelan karaan dhibaatooyin caafimaad oo halis ah inta badana waxay u baahnaadaan daryeel gurmada ah. Haddii CCHD xilli hore la dareemo, hase yeeshee, dhallaanka waa la daawayn karaa waxayna u horseedaa nolol caafimaad leh.



### Sidee carruurta looga baadhaa CCHD?

Carruurta waxa laga baadhi karaa baadhista fudud oo loo yaqaan pulse oximetry. Pulse oximetry waa hawl dhakhso ah oo bilaa xanuun ah oo isticmaasha dareemeyaal la dhigayo maqaarka ilmaha (sida gacanta iyo cagta) si loo go'aamiyo xaddiga ogsijiinta dhiiga.

### Maxay ka dhigan tahay haddii ilmahaagu aanu gudbin baadhista pulse oximetry?

Waxay ka dhigan tahay in baadhistu la dareemay ogsijiinta oo ku yar dhiigga ilmahaaga. Ogsijiinta yar waxay noqon kartaa calaamad CCHD ama xaalado kale sida dhibaatooyin neefsiga ah ama infakshan. Baadhista dheeraad ah ayaa loo baahan yahay si loo ogaado sababta ogsijiinta yar loo dareemay.



## Maxaa xigaya ee dhaca?

Kahor inta adiga iyo ilmahaagu aydaan hoyan, bixiyaha daryeelka ilmahaagu wuxuu diyaarin doonaa baadhis dheeraad ah iyo qiimayn si uu u go'aamiyo in ilmahaagu qabo CCHG.

Baadhista dheeraadka ah waxa kamid noqon kara ku celin baadhista pulse oximetry-ga, echocardiogram (ultrasound-ka wadnaha), electrocardiogram(baadhista hawsha koronteed ee wadnaha), iyo/ama raajada laabta. Haddii aad ku sugan tahay cusbitaal aan bixin karin baadhistan dheeraadka ah, ilmahaagu wuxuu u baahan karaa in loo gudbiyo cusbitaal bixin kara.

Haddii wax kamid ah natiijooyinka baadhista dheeraadka ah ay sheegayso jiritaanka CCHD, markaa ilmahaagu wuxuu u baahan yahay inuu la kulmo dhakhtarka wadnaha carruurta. Dhakhtarka wadnaha carruurta waa kan ku takhasusay dhibaatooyinka wadnaha dhallaanka, carruurta, iyo dhalinyarta. Haddii aad joogto cusbitaal aan lahayn dhakhtarka wadnaha carruurta, ilmahaagu wuxuu u baahan karaa in loo wareejiyo cusbitaal kale kaasi oo leh dhakhtarka wadnaha carruurta.

## Waa maxay daawaynta CCHD?

Carruurta qabta CCHD waxay u baahan yihiin qalliin sannadka u horreeya noloshooda. Ilme kasta oo leh CCHD wuxuu u baahan doonaa qorshe daawayn oo gaar ah oo loo soosaaray wadne xanuunkiisa gaarka ah.

## Khayraadka waaalidka loogu talagalay

American Heart Association: [www.heart.org](http://www.heart.org)

Lasting Imprint: [www.lastingimprint.org](http://www.lastingimprint.org)

Mended Little Hearts: [mendedhearts.org/about-us/about-mended-little-hearts/mendedhearts.org](http://mendedhearts.org/about-us/about-mended-little-hearts/mendedhearts.org)

Parents for Heart: [www.parentsforheart.org](http://www.parentsforheart.org)

The Children's Heart Foundation:  
[www.childrensheartfoundation.org](http://www.childrensheartfoundation.org)



## Su'aalo dheeraad ah oo kusaabsan baadhista pulse oximetry?

Ha ka yabaalin inaad wacdo Barnaamijka Baadhista Dhawaan-dhaladka (800) 664-7772 ama internetka nagu soo booqo [www.health.state.mn.us/newbornscreening](http://www.health.state.mn.us/newbornscreening)

## Firro (notes):